

Maadada loo yaqaan hydroksi-indolyliasetatti (5-) dhiig ka qaadista saamigeeda udiyaargarobistiisa (S-5HIAA)

Hydroksi-indolyliasetatti (5-) verinäyteenottoon valmistautuminen (S-5HIAA)

Inaad si sax ah ugu diyaargarawdaa waa arin muhiim ah

Hal (1) maalin iyo habeenkeeda ka hor inta aan saamiga dhiigga lagaa qaadin ma cunni kartid afogaadho, moos, barquuq (luumu), kiiwi (kiivi), cananaas, liin bambeelo ama liin xaali, qare ama xab-xab ama shamaam, timir, badanjaan (munakoiso), yaanyo, yaanyoshiidshiid, farmaajo (homejuusto) iyo lows ama jows.

Raac talooyinka uu dhakhtarku ku siiyo ee la xiriira daawoqaadashada

Haddii aad daawo qaadato inaad daawadaas joojin karto ka hor inta aan saamiga dhiigga lagaa qaadin waa in aad weydiiso oo kala heshiiso dhakhtarka ku daryeela.

Dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka talooyinkoodi: _____

Talooyinka lagu siiyey oo aad sida ay yihiin u raacdaa waxay suurto galinaysaa in maxsuul lagu kalsoonaan karo oo maadadan lagaa baarayo ah la helo. Haddii aad talooyinkii lagu siiyey khilaaftay ama garab martay, fadlan u sheeg qofka saamiga dhiigga kaa qaadaya.

Faah-faahin dheeraad ah haddii aad u baahato

Haddii aad qabto wax su'aal ah waxaad soo wici kartaa oo weydiin kartaa lambarka adeegga oo ah 09 471 86800 isniinta -ilaa iyo jimcaha saacaddaha u dhexeeya 7.30–15.30. Waxaad ogaataa in aanaan nasiib daro jawaabta saamiga ka soo baxday lambarkan adeegga loogu talo-galay laguugu sheegi karin.